



ILAYS PARTY

Ref: IP/ 0020/19

Date: 07/07/19

WAR MURTIYEED

Xisbiga Ilays isagoo tixraacayo qodobka 120 ee Dastuurka Ku meelgaarka ah ee Federaalka ee dhigayo ”**Dhismaha laamaha Sharci dejinta iyo Fulinta ee maamulada Dowladdaha xubinta ka ah Dowladda Federaalka waa arrimo lagu nidaaminayo dastuurada maamulgoboleedyada,**” qodobka **48aad** faqradiisa **1aad** iyo qodobka **142aad** farqadiisa **1aad**.

Xisbiga Ilays wuxuu u soo jeedinayaa Dowladda Federaalka ee Soomaaliya arrimaha soo socda:

1. Inay Ilaaliso Dastuurka Federaalka iyo Dastuurada Dowladaha xubinta ka ah Dowladda Federaalka.
2. Inay ilaaliso una hogaansamaan Mabaad’ida Federaaleynta Dalka.
3. Inaan faragelin lagu sameyn hannaanka doorashooyinka Jubbaland lana tixgeliyo habraaca Guddiga Doorashooyinka iyo xuduudaha Jubbaland ay dejiyeen.
4. Inaan la carqaladeyn nabadgelyada iyo xasiloona ay ku naaloonayaan shacabka ku nool Jubbaland.

Waxaan si gaar ah u xasuusineynaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaaleynta ee Dowladda Federaalka inaan lagu jirin xilligii dhismaha Dowladgoboleedyada ay doorka ku lahaayeen ee ay hadda Dowladgoboleedyadu dhisan yihiin waana inay u hogaansamaan dastuurka ay sameysteen shacabka Dowlad-goboleedyada Dalka.

WABILAAHI TOWFIIQ

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA

XISBIGA ILAYS



جمهورية الصومال الفيدرالية
حزب إيليس

ILAYS PARTY

Ref: IP/ 0020/19

Date: 07/07/19